

## Information om latent tuberkulos, somaliska

### **Haddii uu ku hayo infekshanka IGRA**

Wadanka Noorway kooxaha qaarkood waxaa looga baadhaa si meerto ah cudurka qaaxada iyadoo la isticmaalayo baadhitaanka dhiiga ee IGRA.

#### **Maxay la macne tahay yeelashada infekshanka IGRA ?**

Baadhitaanka IGRA oo sax noqdaa macnaheedu waxaa weeye in lagu qaadsiiyay cudurka qaaxada. Taana macnaheedu maaha in aad bugto. Waxaa la rumaysan yahay in qiyaastii ugu badnaan 1/3 dadweynaha adduunku ay qabaan IGRA iyagoon la bukaan cudurka qaaxada, macnaheeduna yahay inay qabaan waxa loogu yeedho infekshanka qaaxada ee qarsoon.

#### **Infekshanka qaaxada ee qarsoon miyuu halis badan yahay?**

Qofka qaba infekshankaqaaxada qarsoon waxa uu leeyahay khatar kordhaysa oo ah in ay ku dhaco qaaxadu muddada noloshiisa ama nolosheeda. Ugu badnaan qiyaastii 1 qof 20 kiiba waxay la kulmi doonaan tan. Fursadahaaga ah inaad bukootaa aad ayay u wayn yihiin ka dib marka aad infekshanka qaado, ama haddii nidaamka difaaca jidhkaagu aanu aad u xoog badnayn iyadoo sababtu tahay jirro (tusaale ahaan infekshanka Aids-ka dhaliya eeHIV-ga) ama daawayn (tusaale ahaan kansar ah). Waxaa jira daaweynno loo heli karo qaaxada isla markaana dadka badankoodu ugu bogsadaan si dhammaystiran.

#### **Qof kale ma qaadsiin karaa?**

Dadka qaba qaaxada qarsoon ma bukaan oo ma qaadsiin karaan qof kale.

#### **Ma u baahanahay daawayn?**

Daawayn ka hortag ah ayaa loo baahan yahay xaaladaha qaarkood si la isaga ilaaliyo koboca cudurka qaaxada. Tana waa in uu dhakhtarkaagu qiimeeyaa. Daawayntani gaar ahaan waxay ku habboon tahay shakhsiyaadka qaarkood, iyadoo ay ku jirtaan dadka cudurka dhawaan qaaday, carruurta iyo dadka leh nidaamka difaaca jidhkoodu nugul yahay.

#### **Ma jiraa shay aan u baahanahay in aan si gaar ah ula socdo?**

Yeelashada baadhitaan qabitaanka IGRA macnaheedu maaha in aad u baahan tahay in aad u beddesho hab nololeedkaaga sinaba, laakiin haddii aad bukooto waa in aad ku wargelisaa dhakhtarkaaga in aad tahay qof qaba IGRA/qabto infekshanka qaaxada qarsoon si aad u hubiso in aad hesho daawaynta saxda ah. Tani gaar ahaan waxay si gaar ah u khuseysaa haddii ay soo kobcayaan calaamadaha cudurka qaaxadu, kuwaas oo ah :

o qufac daba dheeraada (in ka badan 3 toddobaad)

o xumad daba dheeraata

o dhidid habeenkii ah

o miisaanka oo dhaca

#### **Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

<http://www.folkhalsomyndigheten.se/amnesomraden/smittydd-och-sjukdomar/smittsamma-sjukdomar/tuberkulos-tbc/>

Mats Erntell  
Smittskyddsläkare  
Smittskydd Halland